

Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid iyo Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweynka ah

Gobolka Washington waxaa uu bixinayaa laba siyaabood oo dheeraad ah oo lagu taageerayo dadka waaweyn ee u baahan caawimo si ay guriga ugu noolaadaan. Barnaamijyadan, ee hoos lagu sharxey, waxaa ay taageeraan daryeelayaashooda qoyska ee aan lacagta qaadan ama waxaa ay taageeraan shakhsiyaadka aan hadda haysan daryeele aan lacag qaadan. Xafiiska Xiriirada Noloshada Bulshada ama xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga waxaa ay bixin karaan macluumaadka dheeraadka ah ama waxaad macluumaad ka heli kartaa online-ka.

Qofkee	Magaca Barnaamijka	Shuruudaha Da'da	Shuruudaha Medicaid	Shuruudaha Kale
Daryeelayaasha	Daryeelka Beddelka ah ee Medicaid (MAC)	Qofka daryeelka helaya waa in uu jiro 55+ daryeelahana waa in uu jiro da'da 18+.	Waxaa ay u baahan tahay in daryeel qaataha uu hadda ku jiro Apple Health (Medicaid).	Qofka daryeelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.
Daryeelayaasha ama Dadka Waaweyn ee aan haysan Daryeele	Taageerada Habboon ee Dadka Waaweyn (TSOA)	Qofka daryeelka helaya waa in uu jiro da'da 55+. Daryeelayaasha waa in ay da'doodu tahay ugu yaraan 18 sano.	Xaq u yeelashada Medicaid shuruud ma ahan. Laga bilaabo 2017, xaq u yeelashada maaliyadeed waxaa ka mid ah dakhliga guud ee bil kasta oo ka yar \$2,205 iyo khayraad dhaqaale oo ka yar \$53,100 oo loogu talogaley shakhsiga ama \$108,647 oo loogu talogaley lammaanaha isqaba.	Qofka daryeelka helaya waa in uu kaalmo ugu baahan yahay hawlaha qaar ee nolol maalmeedka, sida qubeyska, socodka, daawooyinka, wareejinta, iwm.



Daryeelayaasha aan lacagta qaadan waa lafdhabarka adeegyada iyo taageerada aan bixinno muddada dheer. Adeegyadan waxaa loogu talogaley in ay ku caawiyaan daryeelayaasha aan lacagta qaadan in ay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u sii bixiyaan daryeel tayo sare leh iyo in ay xoogga saaraan caafimaadkooda iyo ladnaantooda.

*Adeegyo iyo taageero
xaddidan oo wakhtii
go'an la bixiyo ee loogu
talagalay shakhsiyaadka
iyo daryeelayaashooda
waxaa ay ku
caawinayaan dadka
in ay ugu noolaadaan
nolol madax-bannaan,
caafimaadqab leh
guryahooda.*

Waa maxay waxa ay bixiyaan barnaamijyadan?

Labada barnaamij waxaa ay bixiyaan adeegyo iyo taageero kala duwan ee aad xaq u yeelan karto, oo ay ka mid yihiin:

- Maamulka hawl-guriyeedka iyo adeegyada gaagaaban
- Kooxo taageero iyo la-talin
- Qalabka ama sahay caafimaad oo gaarka ah
- Ikhtiyaarada goobaha sida ku meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka
- Fursado tababar
- Caafimaad Maalintii ee Dadka Waaweyn ama Daryeelka Maalinta ah ee Dadka Waaweyn
- Macluumaadka ku sabsaan daryeel bixinta, khayraadka bulshadaada, adeegyada la heli karo iyo waxyaabo badan.



Hoosta Taageerada Habboon ee loogu talogaley Dadka Waaweyn, adeegyada gargaarka shakhsi ahaaneed (oo ay ka mid yihiin daryeelka shakhsi iyo kalkaalisada) waa ikhtiyaar dheeraad ah, beddelkii goobaha sida ku meelgaarka ah loogu xannaaneeyo bukaanka, ee loogu talogaley dadka waaweyn ee aan haysan daryeele, ee jira da'da 55 ama ka weyn, kuwaas oo ka soo baxa shuruudaha shaqada iyo maaliyadda.

Iyada oo ku xiran xaaladaada, waxaad ku heli kartaa ilaa \$550 bil kasta adeegyo iyo taageero.

Halkee ayaan u raadsadaa macluumaad badan?

La xiriir xafiiska Xiriirada Nolosha Bulshada/xafiiska Hay'adda Degaanka ee Gabowga ee degaankaaga – waxaad ka heli kartaa goobaha iyo telefoon lambarada mareegtada www.waclc.org hoosta qeybta Xiriirka ama wac telefoonka bilaashka lagu waco ee 1-855-567-0252.

Ama booqo www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/caregiver-resources si aad u hesho macluumaad badan oo ku saabsan barnaamijyadan iyo khayraadyada kale ee daryeelaha.